



# OGAYSIIS

Khadka Huruudiga ah ee MBTA baa la xidhi doonaa laga bilaabo Ogosto 19 - Sebtember 19

## SOOMAALI (SOMALI)

### **SIYAABAHA LOO SOCDAALI KARO INTA LAGU JIRO XIDHITAANKA KHADKA HURRIDIGA (ORANGE LINE)**

#### **BUSASKA BILAASHKA AH**

Basaska Khadka Huruudiga ah waxay ka shaqayn doonaan inta u dhaxaysa Forest Hills iyo Back Bay/Copley iyo sidoo kale Oak Grove iyo State/Government Center. Qaado khadka cagaaran ee u dhexeeya Government Center iyo Copley. Basasku waxay imanayaan 45 ilbiriqsi kasta inta lagu jiro saacadaha saxmadda badan. Qorshahaaga ku darso in basaskani ay qaadanayaan in ka badan wakhtiyada uu qaadan lahaa ku safarka Khadka Huruudiga (tareenka) ee caadiga ah.

Dhammaan baabuurta basaska ahi waxay noqon doonaan kuwo u hoggaansama sharciga ADA. Basaska qaarkood waxay lahaan doonaan in hoos loo dajin karo, laakiin badidoodu waxay yeelan doonaan wiishash gadaasha dambe. Gawaarida kursiga curyaanka oo dheeraah ah ayaa la heli doonaa marka la codsado.

#### **BAASKEELADHA BULUUGA AH (BLUE. BIKES)**

Inta lagu jiro xidhitaanka Khadka Huruudiga, 30-maalmood ee kaadhka Baakiillada Buluuga ah oo bilaasha ayaa diyaar u ah dhammaan. Waxaad u isticmaali kartaa kaadhkan si aan xadidnayn oo safar midkiiba yahay 45-daqiiqo oo kharash la'aana. Waxaan dammaanad qaadaynaa baaskiilada iyo meelaha lagu xidho in laga helo dhawr saldhig oo baaskeeladaha buluuga ah. Ku biir, ama iska qor [bluebikes.com](http://bluebikes.com) ama appka taleefanka gacanta.

Booqo [bluebikes.com](http://bluebikes.com) si aad u aragto khariidadda meelaha baakiillada laga hello.

#### **WADASHADA GAWAADHIDA**

Haddii aad awoodo, fadlan ka fogow inaad waddid baabuur inta lagu jiro wakhtigan. Waxaan filaynaa in gobolka oo dhan ay saameyn ku yeelato ciriiriga baabuurta oo ay sababtay xiritaankan. Haddaad guriga joogtid, lugayso, baaskiil kaxaysato ama qaadato gaadiidka dawlada, waxaad meel u banaynaysaa dadka ku khasban inay baabuur kaxeeystaan iyo kuwa u adeegaya gargaarka degdega ah.

Booqo [boston.gov/orange-line](http://boston.gov/orange-line) si aad ula socoto wixii cusub!



# OGAYSIIS

Khadka Huruudiga ah ee MBTA baa la xidhi doonaa laga bilaabo Ogosto 19 - Sebtember 18

## SOOMAALI (SOMALI)

### SIYAABAHA LOO SOCDAALI KARO INTA LAGU JIRO XIDHITAANKA KHADKA HURRIDIGA (ORANGE LINE)

#### TAREENKA RAKAABKA

Qof kastaa wuxuu tareen ka raaci karaa saldhigyada tareenada ee Commuter-ka ee gudaha magaalada Boston si lacag la'aan inta lagu jiro xidhitaanka Khadka Huruudda. Si aad u fuusho, tus kaariga CharlieCard ama CharlieTicket. Uma baahnid inay lacagi ku jirto, umana baahnid inaad iibsato pass ama tigidh tareenada Rakaabka ah. Tani waxay sidoo kale khusaysaa dhammaan Soonaha 1A, 1, iyo 2 ee xarumaha tareenada Rakaabka ee ka baxsan magaalada. Booqo [mbta.com/commuter-rail](https://www.mbta.com/commuter-rail) si aad u hesho khariidadaha iyo jadwalka

CharlieCard waxaa bilaash lagaga heli karaa dhammaan laamaha Maktabada Dadweynaha Boston iyo Guriga Dawladda Hoose dabaqiisa koowaad. Booqo [boston.gov/orange-line](https://www.boston.gov/orange-line) si aad u hesho liiska ugu dambeeyay ee goobaha laga qaadto CharlieCard bilaash ah.

Adeegga Tareennada Rakaabka ah ayaa laga heli karaa saldhigyada Khadka Huruudiga ee soo socda:

- Forest Hills (ku socda Ruggles, Back Bay, iyo South Station)
- Ruggles (ku socda Forest Hills ama Back Bay iyo South Station)
- Back Bay (ku socda Ruggles iyo Forest Hills ama South Station)
- Oak Grove (ku soocda Malden Center iyo North Station)
- North Station (ku socda Malden Center iyo Oak Grove)

Khadadka Needham, Providence/Stoughton, iyo Franklin/Foxborough waxay bixiyaan adeeg saldhigyada ku teedsan Khadka Huruudiga.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan u fududeynta fuulitaanka tareenka rakaabka, booqo [mbta.com/accessibility/commuter-rail-guide](https://www.mbta.com/accessibility/commuter-rail-guide)

Booqo [boston.gov/orange-line](https://www.boston.gov/orange-line) si aad ula socoto!